Horumarka ilmagaaha

Heerarka waxbarashada 2016–17 sanad dugsiyeedka

Washington waxay leedahay K-12 heerarka waxbarasho kaas oo qeexaya aqoonta iyo xirfadaha arday kasta u baahan yahay inuu diyaar u yahay xirfadiisa, kuliyada, iyo nolosha marka ay dhameeyaan dugsiga sare.

Xaga hoose waxaa ku qoran tusaalooyin kooban oo ah ujeedoonyinka waxbarashada muhiimka ah ee Washington ee fasalka 9aad.
Wixii macluumaad dheeraad ah dhamaystir, booqo:

www.YourChildsProgress.com

- **Farshaxanada.** Kala shaandhee xirfadaha bandhiga; sameey, qor oo falanqee muusiga; qor qoraalada hal fal, noqo fikire suugaanta muuqaalka iyo hal abuuraha.
- **Waxbarashada Cilmiga farsamada.** Ku aqoonso oo ku falanqee websaydyada aragti fikrado ka soo horjeeda.
- **Farshahaxanada Luqadda Ingiriiska (ELA).** Falanqey dabeecadaha adag iyo sida fikrada qoraaga loo sameeyay; iticmcaal cilmiga farsamada si aad u soo saarto qoraalada mashruucyada.
- **Waxbarashada Jirka iyo Caafimaadka.** Samee qorshaha waxbarashada jirka/caafimaadka iyo xirfadaha iyo farbarashada caafimaadka taasoo soconeysa qaangaarka.
- **Xisaabta.** Ardayda dugsiga sare caadi ahaan waxay qaataan algebra I, xisaabaha dhibcaha, iyo algebra II. Waxay u qaabeeyaan xaaladaha saxda ah ee dunida, isbarbardhiga shaqooyinka fudud iyo kuwa adag, iyo barashada ku saabsan isle-egyada, wada jira, iyo shaxanada oo dhinaca isbeddelka xisaabta dhibcaha.
- **Saynis.** Falanqee isbeddelada caalamka ee ugu waaweyn iyo xalalka suurtogalka ah; samee oo isticmaal habab; qorshee oo fuli baaritaanada; falanqee xogta.
- **Cilmiga Bulshada.** Baar horumarada ugu waaweyn iyo ee ay sameeyeen dunidan casriga ah oo ay ku jiraan xuquuqaha aadanaha, kacdoonta dimuqraadiyada, iyo dhaqaalaha.

Washington waxay sidoo kale waxay leedahay heerarka waxbarshada ee **Isdhaxgalka Deegaan iyo Waaritaanka, Luqadaha Caalamka, Xirfadaha iyo Waxbarashada farsamada** (qaab dhismeedka iyo warshadda heerarka dugsiga dhexe iyo sare), **Aqoonta Sare ee Ingiriiska** (ELA, xisaab iyo saynis), sidoo kale tilmaamaha **HIV & Caafimaadka Galmada** iyo **Barashada Hore** (dhalashada–fasalka 3aad) taas oo dheelitireyso waxbarashada si fiican loogu soo koobay ardayda oo dhan.

Waxabrashada gaarka ah: Ardayda hela adeegyada waxay leeyihiin hoy, badelo, iyo taageerada lagu aqoonsaday qorshohooda waxbarashada gaarka ah.

Ardayda luqadda Ingiriiska: Ardayda baranaya inay ku hadlaan Ingiriiska waxay leehiyhiin heerarka aqoonta ee Ingiriisida taas oo caawisa qorshaha waxbarashada ee maclinka uu kaga gudbo maadooyinka ku habboon heerka arday kasta ee hormarka luqadda.

FASALKA 9

Ujeedooyinka Waxbarashada Gobolka Washington

Gobolka Washington Sharci Dejinta ayaa aasaasay afar ujeeddo oo waxbarashada ah si ay u bixiyaan saldhigga horumarka ee dhammaan heerarka waxbarashada tacliinta ee gobolka:

1. Akhri fahamka, u qor si fiican, oo ula xidhiidh si guul ah siyaabo kala duwan iyo goobo iyo dhagaystayaal kala duwan;

2. Baro oo codso aqoonta guud iyo mabaadi'da xisaabta; bulshada, jidhka, iyo cilmiga nolosha; cilmiga bulshada iyo taariikhda, oo ay ku jiraan dhaqamada iyo ka qaybgalka wakiilka dowladda; juqraafiga, farshaxanka; iyo caafimaadka iyo jidh dhiska;

3. Fikir si falanqayn ah, macquul ah, iyo hal-abuurimo ah, iyo in ay dhexgalaan qorista cilmiga casriga ah si fiican iyo sidoo kale waayo-aragnimada kala duwan si loo dhiso xukun sababaysan iyo xalinta dhibaatooyinka; iyo

4. Fahan muhiimadda shaqada iyo maaliyadda iyo sida soo waxqabadka hawsha, dadaalka, iyo go'aannada si toos ah u samaynaya mustaqbalka iyo fursadaha waxbarasho.

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha
Office of Superintendent of Public Instruction
www.k12.wa.us

September 2016, Publication No. 16-0040

Imtixaanka Gobolka Washington

Sharciga fedraalku waxa uu u baahanyahay imtixaanka sannadlaha ah ee ardayda fasalada 3-8 iyo marka ay galaan dugsiga sare farshaxanada luqaddda Ingiriiska (ELA) iyo xisaabta, iyo fasalada 5 iyo 8 iyo marka ay ku jiraan dugsiga sare sayniska.

Gobolka Washington sidoo kale waxa uu u baahanyahay ardaydu inay baasaan imtixaanada gaarka ah si ay ugu qalmaan inay ka qalinjabiyaan dugsiga sare. Haddii ardaygu aanu daboolin heerka hal ama ka badan imtixaanada looga baahanyahay qalinjabinta, isaga/iyadu waxay dib u qaadan kartaa imtixaaanka, ama ay u heli karaan waxa lagu beddelo oo gobolku ansixiyay.

Inta ugu badan ardayda dugsiga sare waxay qaadanayaan imtixaanada **Smarter Balanced** iyo imtixaanada sayniska si loogu qanco shuruudahan. Imtixaanadu waxa laga yaabaa in la qaato iyagoo leh agab ama agab la'aan, taageerooyinka ama hoy.

Ardayda qabta caqabadaha weyn ee garashada ee ku qoran Barnaamijkooga Waxbarashada Gaarka ah (IEP) qaado Washingon – Helitaanka waxbarashada iyo Cabirka (**WA-AIM**) ee ELA, xisaabta iyo sayniska.

Imtixaanka gobolka waa *inaan* marnaba noqon xukunka kaliya ee xirfada tacliinta ardayda iyo aqoonta. Haddii aad qabtid su'aalo walba ee ku sabsan waxbarashada canugaaga, fadlan la xiriir maclinka canugaaga ama dugsiga.

Fasalka 2020

Imtixaamada Looga baahanyahay Qalinjabinta

(Dooro mid maadadiiba)

FARSHAXANADA LUQADDA INGIRIISKA

- Imtixaanka Smarter Balanced ELA
- WA-AIM

XISAABTA

- Imtixaanka xisaabta Smarter Balanced
- WA-AIM

SAYNISKA

- Imtixaanka bayoolojiga EOC
- WA-AIM

Ardayda baraneyso inay ku hadlaan Ingiriisida fasalada K-12 waxay qaadanayaan Qiimeynta Aqoonta ee Luuqadda Ingiriiska Qarniga 21aad (**ELPA21**). Qiimeyntaan waxay cabirtaa xifadaha luqada Ingiriiska iyo koboca sanadlaha ah ee akhrinta, qoraalka, dhegeysiga iyo ku hadalka. Ardayda helaya heerka aqoonta ee soo Shaac baxaya ama Hormaraysa ee ku saabsan u qalmida ELPA21 si loo helo adeegyada taageerada barnaamijka luqadda Ingiriiska.

Imtixaanada ee Heerka Fasalka 2016–17

	3aad	4aad	5aad	6aad	7aad	8aad	9aad	10aad	11aad	12aad
ELA	✓	✓	✓	✓	✓	✓		1	1	3
Xisaabta	✓	✓	✓	✓	✓	✓		1	1	3
Sayniska			✓			✓	2	✓	3, 4	3

Qoraalo:

1. Ardaydu way karaan, laakiin loogama baahna, inay qaadato imtixaanada ELA iyo/ama xisaabta fasalka 10aad. Ardayda qaata midkood ama labadoodaba imtixaanda fasalka 10aad iyo kuwa gaara Heerka 3 ama 4 uma baahna inay qaataan imtixaanada fasalka 11aad.
2. Fasalada sagaalaad waxay qaataan imtixaanka bayoolojiga ee EOC kaliya haddii ay qaadanayaan koorso gaar ah. Ardayda qaata imtixaanka bayoolojiga EOC kahor fasalka 10aad oo daboola heerka uma baahna inay dib ugu qaataan fasalka 10-aad. Baasitaanka imtixaanka bayoolojiga EOC wax looga bahanyahay fasalka 2017 iyo wixii ka dambeeya.
3. Waxay lagamamaarmaan tahay kaliya haddii ardaydu aanay daboolin shuruudaha qalinjabinta qiimeynta gobolka.
4. Ardayda leh caqabadaha weyn ee garashada ee ku qoran IEP-gooda waxay qaadanayaan qiimeynta saynis kale ee fasalka 11aad, halkii ay ka qaadan lahaayeen fasalka 10aad, marka imtixaanka bayoolojiga EOC si caadiya loo maamulo.

- Qiimeynta Aqoonta ee Luqadda Ingiriiska lagama maarmaan ayay u tahay ardayda baraneysa inay ku hadlaan Ingiriiska. Imtixaanka ardayda si looga qalmo helitaanka taageero. Waxay sii wadayaan imtixaanka, sanadlaha, ilaa ay ka gaaraan aqoonta luqadda Ingiriisida.

Waqtiyada Imtixaanka Gobolka

Imtixaanka waxaa loo qorsheeyey waqtiyadaan hoos ku qoran gudahood. La xidhiidh dugsiga degmada ee degaanka si aad u ogaato taariikhda ilmahaaga lagu imtixaamayo.

WAQTIYADA IMTIXAANKA GOBOLKA	
Oktoobar 17– Abriil 7:	WA-AIM
Feb 1– Mar 14 *(gaadh)*:	ELPA21
Maarso 6 – Juun 9:	Smarter Balanced
May 8 – Juun 9:	EOC

OSPI waxay bixisaa wararka dhibcaha ee dhammaan imtixaanada kor ku xusan. La xidhiidh dugsiga degmada ee degaanka wixii macluumaad dheeraad ah.

Maxaa Dhibcaha imtixaanka gobolka looga jeedaa?

Heerka **4** — **Heerka gaaritaanka ka sareeya:** Wuxuu muujiyaa horumar horumarsan xagga macalinimada oo ah aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Heerka **3** — **La kulmaya heer gaadhitaanka:** Wuxuu muujiyaa horumar horumarsan xagga macalinimada oo ah aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Heerka **2** — **Ku dhowaan la kulmi karra heerka gaadhitaanka:** laga yaabaa in u baahan yahay horumarin dheeraad ah si ay u muujiyo aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Heerka **1** — **Lama kulmayo heerka gaadhitaanka:** Ubaahan Horumarin la taaban karo si ay u muujiyaan aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

www.YourChildsProgress.com

September 2016, Publication No. 16-0040